



ismaamulka san diego

sunta bacrinta ee beeraha



Aan Kuligeen Qaadano Doorkeena!

Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnadeena biyaha. Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya in **ka badan 50% dadka deegaanku ay** aaminsan yihiin in wasaqda gasha balida, harooyinka, iyo xeebaha ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.

Diyaar ayaan u nahay Inaan ku Caawino.

Daawada beeraha waxaa ku jira nafaqooyin faa'iido u leh geedaha. Hase yeeshee, nafaqooyinkaan ayaa si fudud u raaci kara biyaha roobka ama waraabka. Haddii daawada beeraha aan si sax ah loogu shubin, waxay geli karaan daadka roobka waxayna geli karaan marinnada biyaha oo ay markaas dilayaan kaluunka iyo nolosha geedaha. Sunta beeraha ee xad dhaafka ah ee lagu shubo marinadeena biyaha ayaa quudinaaya algae oo aad ugu koraysa dusha, taasoo xiraysa in qoraxdu u dhacdo geedaha iyo kaluunka ka hooseeya. Barnaamijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ka taageeraaya dadka deegaanka dedaaladooda kahortaga wasaqda biyaha asagoo siinaaya **tilmaamahaan muhiimka ah ee ka hortaga in sunta beeruhu gasho biyaha daadka.**



Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka raabka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.

Maxaad Samayn Kartaa Si aad U ilaaliso Nadaafada Biyaheena?

- **U mari sunta beeraha si waafaqsan heerka ku qoran dhalada daawada** iyo keliya cadadka beertu u baahan tahay.
- **Tirtir wax kasta oo daata.**
- **Sunta beeraha si siman ugu daadi dhulka** si aysan biyaha u raacin iyo si ayadoo diyaarsan ay u isticmaalaan geeduhi.
- **Adeegso Ilaalinta BMP-yadda** (duubabka cawska, ilaalinta qaruuraxa, iwm.) si aad u xakamayso sunta beeraha.
- **Adeegso dhoobo** si aad u yarayso baahida loo qabo sunta bacriminta.

**Waad ku mahadsan
tahay inaad doorkaaga
ka qaadatay difaacida
kanaaladeena biyaha.**

Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah.
1-888-846-0800
watersheds@sdcounty.ca.gov
www.sandiegocounty.gov/stormwater